

Xeerka Macmiilka



scottish
refugee
council

October 2011

Client Charter - Somali

Scottish Refugee Council waa samofale siisa talo aan eex lahayn, gargaar iyo taageero magan-gelyo doonka iyo qaxootiga gudaha Scotland. Waxaan nahay urur madax-banaan.

Waxaad xaq u leedahay:

- 1 Adeeg xor iyo qarsoodi ah;
- 2 Isticmaalka adeegga khadka la-talinta tilifoonka ee bilaashka ah;
- 3 Talo iyo macluumaad aan eex lahayn;
- 4 Macluumaad la xidhiidha isbeddelada siyaasadda Dawladda UK iyo Scottish-ka;
- 5 Adeegyada tarjumaan haddii loo baahdo;
- 6 In aad codsato nin ama naag shaqaale-kiis ama tarjumaan oo aan isku-dayno in la fuliyo codsigaas; iyo
- 7 Cabato haddii aanu buuxin weyno heerarka adeegga.



Adeegayagu waa xaddidan yihiin:

- 1 Isniinta, Salaasada, Khamiista iyo Jimcaha aroornimada waxaanu bixinaa la talin kadis ah laga bilaabo 9:30 – 12:30. Isniinta, salaasada, Arbacada iyo Jimcaha galinka dambe waxaanu bixinaa la talin ballan leh oo kaliya laga bilaabo 14:00 – 16:00
- 2 Ma xannaanayn karno carruurtaada.
- 3 Ma samayno booqashooyinka guriga.
- 4 Waxaan ku siin karnaa ikhtiyaaro kala duwan, laakiin kuuma samayn karno adiga. Doorokayagu waa inaan kugu gargaarno inaad wax qabsato adigu.

Dhammaan shaqaalaha kiisaska Scottish Refugee Council:

- 1 Waxay ilaalin wakhtiga – haddii aanu daahno, waanu kula socdsiin doonaa in kasta oo aanu sharax ka bixin karin sababta ay tani kiiska u tahay iyadooy ugu wacan tahay qarsoonaanta kiisaska kale;
- 2 Waxay ka soo jawaabi wicitaanada 24 saac gudahood (aan ahayn dhammaadka toddobaadka iyo maalmaha fasaxa); oo
- 3 Waxay ku qaban ballan kale sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah haddii aan u baahano burinta ballankii hore.

Haddii aanad ku qanacsanayn adeegyadayada:

- 4 la hadal la-taliyahaaga oo kala xaajoo dhibaataada isaga
- 5 haddii aad jecalysato, arrimahaaga u dhiib xubin sare oo ka mid ah shaqaalahayaga

Haddii aanad wali ku qanacsanayn:

Waydiiso inaad isticmaasho habka cabashada. Waxaad u caban kartaa Xafiiska Wakiilka Haajiridda (OISC): <http://www.oisc.gov.uk/>